DEPARTMENT OF EDUCATION

Heerarka Luqadda Afka-Ingiriisiga ee Minnesota

Hagaha Qoysaska iyo Daryeelayaasha ee Taageeridda Barashada Ilmahaaga

Waa Maxay Heerarka Waxbarasho?

Heerarka waxbarasho waa yoolalka barashada ee qeexaya waxa ardayda ay tahay inay ogaadaan oo ay awoodaan inay sameeyaan dhammaan maadooyinka marka uu dhammaado fasal kasta. Heerarkan waxay hubiyaan in dhammaan ardayda Minnesota ay helaan waxbarasho tayo sare leh oo u diyaarinaysa shaqooyinka, kulliyadda iyo guud ahaan nolosha.

Minnesota gudaheeda, waxaan leenahay heerar waxbarasho oo maadooyin badan ah, oo ay ku jiraan Far-Ingiriisiga (ELA). Heerarkan waxa dib loo eegaa loona cusboonaysiiyaa tobankii sanaba mar iyadoo ay sameeyaan guddi ka kooban macallimiin, xubno bulshada ka tirsan, iyo khubaro maadada ku takhasustay. Heerarka Far-Ingiriisiga markii ugu dambeysay waxa la cusboonaysiiyay 2020, waxaana loo baahan yahay in lagu dhigo dhammaan fasallada laga bilaabo sanadka dugsiga 2025–26.

Sidee bay Heerarka ELA ee 2020 uga Duwan Yihiin kuwii Hore?

Dhismayaasha Aasaasiga ah
Xirfadaha aasaasiga u ah akhrinta iyo qoraalka ayaa si xooggan loo adkeeyay, waxaana taa loo arkaa assaaska muhiimka ah ee waxbarashada.

Macnaha Ballaadhan ee “Qoraal”
Qoraalka wuxuu haddaka koobanyahay qoraallada caadiga sida (buugaag, maqaal) iyo sidoo kale hababka dhijitaalka ah sida podkaastyada, fiidiyowyada, iyo mareegaha.

Aragtiyo Kala Duwan
Ardayda waxay akhriyaan qoraallo ka tarjumaya aragtiyo kala duwan, oo ay ku jiraan aragtiyaha Dakota iyo Anishinaabe.

Suugaanta Warbaahinta.
Xirfadaha fahanka iyo falanqaynta warbaahinta casriga ah waxaa si guud loogu dhex daray heerarka, si ay ardaydu si firfircoon u fahmaan, u qiimeeyaan, uguna abuuraan nuxur dijitaal ah.

Doorashada Ardayga ee Waxbarashada
Ardayda waxay helayaan fursado badan oo ay ku doortaan waxbarashadooda iyaga oo gaaraya go’aanno ujeeddo leh marka ay akhrinayaan, qoranayaan, dhageysanayaan, ama hadlaanayaan.

Maxay Ilmahaygu Baran Doonaan?

Heerarka ELA ee Minnesota 2020 waxa loo habeeyey saddex qaybood: (1) Akhris, (2) Qoris, iyo (3) Dhageysi, Hadal, Daawasho, iyo Is-weydaarsiga Fikradaha.

1. Akhriska: *Macne u sameyn xogag ka yimaadda iloyin kala duwan*

- ✓ Dhisidda xirfadaha aasaasiga u ah akhriska sida phonics iyo akhriska si hufan
- ✓ Akhrinta buugaag, maqaal, mareegaha, iyo agab kale si faham leh
- ✓ Ka fekerid si qoto dheer oo naqdiyad leh wixii ay akhriyaan, kuna soo bandhigaan su’aalo miisaaman oo xog-ogaalnimo leh
- ✓ Akhrinta qoraallo iyo agab metelaya aragtiyo, fikrado, iyo dhaqammo kala duwan
- ✓ Kala saaraan xog lagu kalsoonaan karo iyo xog aan lagu kalsoonaan karin

2. Qorista: *La wadaagista fikradaha iyo macluumaadka dadka kale*

- ✓ Horumarinta xirfadaha qoris ee aasaasiga ah, oo ay ku jiraan naxwaha, higgaadda, iyo calaamadaha qoraalka
- ✓ qoridda ujeeddooyin kala duwan oo nolosha dhabta ah — wargelin, ku qancin, dood, ama hal-abuur
- ✓ Adeegsiga hab-raac qoran oo dhammeystiran: qorshayn, qodobayn (drafting), dib-u-eegis, iyo saxid
- ✓ Si qeexan u muujiyaan codkooda gaarka ah iyo aragtidooda qoraalada ay sameeyaan
- ✓ Sameeyaan baaritaanno iyo cilmi-raadin, kuna taageeraan fikradahooda caddeymo la isku halayn karo

3. Dhagaysiga, Hadalka, Daawashada, iyo Is-weydaarsiga Fikradaha:

Isgaarsiinta iyo la shaqaynta dadka kale

- ✓ Si taxaddar leh u dhagaystaan oo si cad oo habboon uga hadlaan doodaha iyo wada sheekaysiyada
- ✓ La wadaagaan fikradahooda gaarka ah iyaga oo ixtiraamaya aragtiyada iyo mowqifka dadka kale
- ✓ Si wadajir ah ugula shaqeeyaan ardayda kale hawlaha iyo mashaariicda kooxeed
- ✓ U soo bandhigaan macluumaad iyo warbixinno dhagaystayaal kala duwan
- ✓ Si ammaan ah, si naqdiyad leh, oo si miyir-qab leh ugu dhex socdaan warbaahinta dhijitaalka ah

Maxaa Tani Ka Muuqan Doontaa Fasalka Ilmahayga?

Minnesota waxay dejisaa heerarka waxbarasho ee dhammaan ardayda gobolka. Si kastaba ha ahaatee, dugsiga deegaankaagu ayaa go'aamiya sida loo baro heerarkaasi. Tani waxay ka mid tahay:

Manhajka: Buugaagta, barnaamijyada, iyo agabka gaarka ah ee macallimiintu isticmaalaan.

Hababka Waxbaridda: Sida macallimiintu ardayda uga caawiyaan barashada nuxurka iyo xirfadaha ELA.

Qiimaynta: Hawlaha ama imtixaannada loo adeegsado cabbiraadda heerka barashada ardayda ee heerarka waxbarasho.

La hadal macallinka ilmahaaga ama maamulaha dugsiga si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sida heerarka ELA loogu baro dugsigaaga, iyo si aad ula wadaagto aragtidaada ku saabsan waxbarashada ilmahaaga.

Fahamka Imtixaanka Gobolka: Imtixaanka Akhriska ee MCA

Ardayda fasallada 3–8 iyo 10 waxay dhammaan galiyaan Imtixaanka Minnesota ee Akhriska (MCA) xilliga guga. Imtixaankani wuxuu la jaanqaadaa qaybta Akhriska ee heerarka cusub ee ELA, wuxuuna bixiyaa sawir kooban oo ku saabsan heerka waxbarashada ardayga. Natiijooyinka waxaa loo adeegsadaa in lagu ogaado sida dugsiyadu ugu guulaystaan baridda heerarka. La xiriir macallinka ilmahaaga haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan MCA-ga ama natiijooyinka ilmahaaga.

Sideen Baan Uga Taageeri Karaa Waxbarashada Ilmahayga?

- La xiriir macallinka ilmahaaga si aad u wadaagtaan waxa ilmaha jecel yahay, awoodihiisa, iyo baahiyihiisa waxbarasho
- Ka qayb qaado hawlaha dugsiga si aad qayb uga noqoto go'aamada la xiriira manhajka
- La akhri ilmahaaga oo ka wada hadla waxa aad akhriseen
- Ku ciyaara luqadda heeso, halxiraalayaal, iyo ciyaaro erayo ku salaysan
- Wada qorta ujeeddooyin nolosha dhabta ah, sida warqadaha mahadnaqa, liisaska raashinka, ama sheekooyinka qoyska
- Ka wada hadla dhacdooyinka waqtiga iyo aragtiyada kala duwan ee jirta
- U noqda tusaale wanaagsan oo ku saabsan isticmaalka suuban iyo nabdoon ee tiknoolojiyadda dhijitaalka ah

Si aad u hesho taageerooyin dheeraad ah oo kor u qaada akhriska hore ee carruurta da'da dhalashada ilaa sagaal jir, eeg **Families READ Toolkit** https://education.mn.gov/MDE/dse/READ/eng/toolkit/ ama adeegso koodhka QR-ga:

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan heerarka ELA ee Minnesota Department of Education ELA webpage booqo bogga https://education.mn.gov/MDE/dse/stds/ela/ ama adeegso koodhka QR-ga: